



ar bg cs de it pl ro ru **so** ti tr

Qoraalka tilmaamaha ee ku saabsan masuuliyadda waalidnimada ee waalidiinta aan is qabin

Yaa leh masuuliyadda waalidnimada, haddii ayasan waalidku is qabin?

- Haddii waalidku aysan samayn caddaynta masuuliyadda, hooyada qaangaarka ah ayaa ah qofka keliya ee haya masuuliyadda waalidnimada.
- Haddii waalidiinta aan is qabin ay rabaan inay si wadajir ah isula yeeshaan masuuliyadda waalidnimada, waa inay markaas sameeyaan caddaynta masuuliyadda, taasu micnaheedu waa inay soo sharraxaan inay rabaan, inay si wadajir ah isula yeeshaan masuuliyadda waalidnimada. Khasab ma aha in waalidku wada noolyihiin.
- Labada waalidba waa inay caddeeyaan inay rabaan masuuliyadda waalidnimada. Caadayntani waxaa la samayn karaa isku mar labada waalid oo jooga ama kali ahaan. Ta ku saabsan soo gudbinta shaqsiga ah, masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah ma dhaqan galayso kahor wakhtiga bayaanka labaad ee masuuliyadda waalidnimada. Ilaa markaas, bayaan uu sameeyay mid kamid ah waalidiinta weli waa laga noqon karaa. Si kastaba ha ahaatee, taasu waa in lagu sameeyaa notaayo halkaasna lagu xaqiijiyaa.
- Haddii Hooyadu diido inay samayso caddaynta masuuliyadda waalidnimada, kadib markii uu aabuhu codsaday masuuliyadda waalidnimada, wuyuu ka codsan karaa Go'aan Maxkamadda Qoyska. Maxkamaddu waxay amri kartaa, sababo la xiraara masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah si buuxda ama ilaa xad haddidan, haddii la filayo, in tani tahay danta ilmaha
- Adeegsiga xuquuqda xiriirinta Cunnugga, wax saameyn ah kuma laha xiriirka masuuliyadda waalidnimada ee jira (Masuuliyadda keliga ah ee hooyada ama masuuliyadda wadajirka ah).

Maxay tahay in la tixgeliyo marka la gudbinayo sharaxaadda masuuliyadda?

- Sax ahaanshaha caddaynta masuuliyadda waalidnimada, waxay ku salaysan tahay aqoonsiga aabanimada oo ansax ah.
- Caddaynta masuuliyadda waalidnimada, waa inay waalidku si shaqsi ahaan ah u soo gudbiyaan.
- Waxaa suurtoagal ah, in la soo gudbiyo caddaynta waalidnimada kahor intuuusan cunugu dhalan.
- Caddaynta masuuliyadda waalidnimada waa in si bablik ah loo xaqiijiyo. Shahaadada waxaa caadi ahaan bixiya Jugendamt si lacag la'aan ah, ama sidoo kale notaayo.
- Shuruudo ama wakhti xaddidan, laguma dari karo caddaynta masuuliyadda waalidnimada. Masuuliyadda wadajirka ah waalidku ma qaybin karaan, tusaale ahaan, iyadoo la dhowrayo xaqqa degganaanshaha, ama aag-hoosaad kale oo loogu talagalay hal waalid. Caddaynta masuuliyadda waalidnimada - isla marka la sameeyo masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah, lagama noqon karo waxaana la samayn karaa hal mar oo keliya.
- Caddaynta masuuliyadda ee waalidnimada ma aha mid wax tar leh, haddii masuuliyadda waalidnimada mar hore lagu xalliyay Go'aan maxkamadeed.

Fiiro muhiim ah:

Masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah waxaa beddeli kara oo kaliya Maxkamadda Qoyska.

Ka waran masuuliyadda waalidnimada, haddii hal waalid dhinto?

- Marka laga hadlayo masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah, haddii hal waalid dhinto, waalidka nool wuxuu xaq u leeyahay masuuliyadda waalidnimada.
- Haddii masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah aan la diwaangelin, haddii ay hooyadu dhimato, Maxkamaddu waxay aabaha ku wareejinaysaa masuuliyadda waalidnimada, haddii taasu aysan kahor imaamaynin danaha ilmaha.

Daabac

Bixiyaha
Caasimadda Gobolka Dresden

Jugendamt
Telefoon (03 51) 4 88 47 41
Telfakis (03 51) 4 88 46 03
E-Mail jugendamt@dresden.de

Xaafiiska Saxaafadda-, Xiriirka Dadweynaha iyo Habmaamuuska
Telefoon (03 51) 4 88 23 90
Telfakis (03 51) 4 88 22 38
E-Mail presse@dresden.de

Postfach 12 00 20
01001 Dresden
www.dresden.de
facebook.com/stadt.dresden

Lambarka maamulka dhexe 115 – Waan jecelnahay su'aalaha

Shaqaalaha tifaftirka: Qaybo qoraalka waxaa fuliyay DIJuF waxaana tafatire ahaa Jugendamt ee Caasimadda Gobolka Dresden.

Febraayo 2020

Dukumiintiyada elegtarooniga ah oo leh saxiixa elegtarooniga, oo ansaxa ah waa la soo gudbin karaa iyadoo la adeegsanayo foom. Waxaa kaloo jira iktiyaari, in E-Mailka loo soo gudbiyo Caasimadda Gobolka Dresden oo leh Shahaadada- S/MIME. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa www.dresden.de/kontakt. Qoraalkan macluumaadku wuxuu kamid yahay qayb shaqada xiriirka Dadweynaha ee Caasimadda Gobolka Dresden. Lama oggola in loo adeegsado xayaysiinta doorashada. Si kastaba ha ahaatee, xisbiyadu waxay u adeegsan karaan inay ku wargeliyaan xubnahooda.